



1437 Bannock St.  
Denver, CO 80202  
p: 720.865.7695  
[JIC\\_news@denvergov.org](mailto:JIC_news@denvergov.org)

## War-Saxaafadeed Faafin Degdeg ah

Jimce, Abriil 3, 2020

---

### Denver oo Waddooyin Cayiman ka Xireysa Socodka Baabuurta xilli la Fulinayo Xeerkara Kala Fogaanshaha COVID-19 Awgii

**DENVER** - Waaxda Gaadiidka iyo Kaabayaasha ee Denver ayaa si ku-meelgaar ah socodka baabuurta ka joojineysa waddooyin cayiman si shacabka reer Denver loo sameeyo nafaas badan oo ay ku socdaan, baskiillada ku wadaan ayna ku ordain iyaga oo hoggaansamaya shuruudaha kala fogaanshaha. Nafaaskani dheeriga ah, oo aan hadda loo isticmaalin socodka baabuurta, ayaa u saamaxaysa dadka in ay ku raaxeystaan bannaanka ayna dareen wanaagsan u yeeshaan in ay soo lugo baxsadaan, ay baskiillada wadaan ama ay hawo nadiif ah qaataan xilligaan. Iyada oo si rasmi ah socodka baabuurta laga xirayo meelaha qaar, ayaa maamulka magaalada waxa uu rajeynayaa in uu bixiyo dareen nabad ah oo waafaqsan dadaalladiisa [Vision Zero](#) dadaalladiisa ee uu ku waddooyin ammaan ah u fidinayo dhammaan dadka.

Waddooyinka laga xiri doono socodka baabuurta maalinta Sabtida, 4-ta Abriil, waa:

**Xaafadda Capitol Hill**

- o E. 11<sup>th</sup> Avenue laga soo bilaabo Lincoln Street illaa iyo Humboldt Street

**Xaafadda Sloan Lake**

- o Bryon Place laga bilaabo Zenobia Street illaa iyo Stuart Street
- o Stuart Street laga bilaabo 24<sup>th</sup> Avenue illaa iyo 21<sup>st</sup> Avenue

**Xaafadaha North Capitol Hill/City Park West**

- o E. 16<sup>th</sup> Avenue laga bilaabo Lincoln Street illaa iyo City Park Esplanade

Meelo dheeri ah ayaa dib-u-eegjs lagu sameynaya si looga dhaqangeliyo waxaana maalmaha soo socda lagu soo bandhigi doona qaybta loogu talagalay COVID-19 ee bogga magaalada ee ah [www.denvergov.org](http://www.denvergov.org). Meelaha marka koowaad la eegayo waa xaafadaha ay dadkoodu badan yihiin ee baahi badan loo qabo nafaas isla markaana beeraha ku dhowdhowna laga dareemayo isticmaal xooggan ayna buuxsamayaan. Meelaha magaalada ka mid ah oo aan si dhaqso ah u heli karin beeraha ama dariiqa dadka ayaa sidoo kale mudnaanta la siinaya.

In kasta oo waddooyinka laga xirayo socodka baabuurta, ayaa haddana isticmaalka maxalliga ah wali la oggolaan doonaa, taasi oo ka dhigan in dadka ku nool xaafadda, ama u baahan in ay tagaan meel ka mid ah waddada xiran, wali waa loo oggolaan doonaa. Dadka ku jira baabuurrada waxaa lagu dhiirrigelinaya in ay tartiib u socdaan isla markaana ay taxaddar badan ku muujiyaan waddooyinkani la isla isticmaalayo.

Hawlaha laga oggolaan doono qaybaha waddooyinkan laga xiray socodka baabuurta waxaa ka mid ah:

- Hawlaha xawaaraha hooseeya oo ay ka mid yihiin socodka, baskiil wadidda iyo orodka. Dadka waa in ay dhowraan kala fogaanshaha isla markaana ay maanka ku haayaan dadka kale iyada oo aan loo eegeynin qaabka ay u safrayaan.
- Baabuurta xaaladaha degdegga ah iyo dadka ku dhaqan xaafadda waa loo oggol yahay in ay isticmaalaan.
- Dadka qabanaya hawlaha ganacsiyada laga maarmaanka ah sida dalabaadka oo guryaha dadka loogu geynayo ama dalabaad laga qaadanayo bilowga ama dhammaadka waddadka ayaa sidoo kale loo oggol yahay in ay isticmaalaan waddada.
- Gaariga oo waddada lagu baakimo waa la oggol yahay. Hase yeeshee, Denver wali waa ay dhowrseysaa goobaha loo faarujiyo biyaha dab-damiska, goobaha aan loo oggoleyn in baabuurta lagu joojiyo, goobaha rarka, waddooyinka guryaha hortooda ah oo xiran iyo dariiqyada yaryar. Macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan [xeerarka baakinka ee hadda jira](#) aaddan waxaa laga heli karaa bogga maamulka magaalada.

Hawlaha aan laga oggoleyn waddooyinkani socodka baabuurta laga xiray waxaa ka mid ah, kuna koobneyn:

- Isku imaatinka dadka badan
- Baashaal
- Miisas, kuraas la dhigto, aaladaha muusikada oo lagu tumo, iwm.

Dadka walaac ama su'aalo ka qaba isticmaalka waddooyinkani waxa ay waci karaa 311.

Uruurinta wasakhda, nadiifinta waddooyinka, iyo hawlaha bixinta barafka wali waa ay ka jiri doonaan waddooyinkani sida ku-meelgaarka ah loo xiray. Waddooyinka illaa amar dambe waa ay xirnaan doonaan, iyada oo taasi ay waafaqsan tahay Amarka Guryaha Jooga ee uu bixiyay Gobolka Colorado.

Macluumaad dheeri ah oo ku aaddan xiritaanka waddooyinka waxaa lagu bandhigi doonaan qaybta COVID-19 loogu talagalay ee bogga maamulka magaalada ee ah [www.denvergov.org](http://www.denvergov.org) ama iyada oo la waco 311.

###